



## Dugsiyadu waxay bilaabeen u dabbaaldega Bisha Taariikhda Madow

Bisha Taariikhda Madow waxay ka socotaa waddanka oo dhan, ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland-na waxay kaga qaybqaadanayaan degmada oo dhan, isku-imaatinno, manhaj, nashqado iyo waxqabadyo kale kuwaasi oo lagu waynaynayo looguna dabbaaldegayo guulaha Afrikaanka Ameerikaanka ah.

Salaasadii dugsiya sare ee Grant High School, Midawga Ardayda Madow iyo ardayda fasalka sinnaantu waxay kor u qaadeen calanka Black Lives Matter (Nolosha Madowgu Dhayal Maaha) dugsiya hortiiisa. Sare-u-qaadista calanku waxay bilawday bil munaasabado ah oo ka dhacaya Grant oo ay kujiri doonaan kulanka Bisha Taariikhda Madow iyo munaasibad Race Forward ah oo looga gol leeyahay in gacan lagaga gaysto caadiyeynta wada sheekaysiga kusaabsan isirka oo dhex mara ardayda iyo shaqaalaha.

Dugsiya sare ee Roosevelt High School mar labaad wuxuu ka tirsanaan doonaa dugsiyada qabanaya munaasibadda Hoodies Up. Munaasibadda, taasi oo waddanka oo dhan ka dhacaysa, waxa lagu xusayaa Trayvon Martin, wiilkii Afrikaanka Ameerikaan ahaa ee geeridiisii 2012 ay bilawday dhaqdhaqaaqa qaran ee Black Lives Matter.

Tusaalayaal munaasibadaha kale ee Bisha Taariikhda Madow ee degmada oo dhan:

**Kulamo iyo isku-imaatinno:** Dugsiyada degmada oo dhan waxay qaban doonaan kulamo iyo isku-imaatinno, ay kamid yihiin:

- Dugsiya Hoose ee Dr. Martin Luther King Jr. Elementary School wuxuu qaban doonaa Black Panther Breakfast and Talk (Quraacda iyo Hadalka Harimacadka Madow), oo ah habeen barashada dhaqameed, iyo guddiyada bulshada iyagoo kaashanaya Maktabadda Degmada Multnomah ee kusaabsan halabuurada ganacsiga ee madow, muujinta farshaxanka iyo hadalka koox fannaaniin arday ah.
- Dugsiya hoose ee Buckman Elementary wuxuu qaban doonaa laba kulan, iyadoo durbaanlayaasha da Vinci Middle School African ay xafladda furi doonan, iyadoo cidda labaad ee masrax imanaysaana ay ka sheekayn doonto taariikhda muusiga hip-hop.
- Midawga Ardayda Madow ee dugsiya dhexe ee Lane Middle School waxay abaabulayaan kulan dugsiya oo dhan oo ay kaqaybgali doonaan fannaaniinta deegaanku.
- Dugsiya hoose ee Stephenson Elementary wuxuu qaban doonaan kulan uu kaqaybgali doono “Karida,” oo ah barnaamij daawadaha da’da yar oo kusaabsan taariikhda cajalka ee jiilal badan oo jaaska Afrikaanka ah.
- Dugsiya sare ee Alliance High School ee Meek wuxuu qaban doonaa kulan ah Midawga Ardayda Madow oo ay ku xigto qado ay kariyeen ardayda cunto karinta barataa.
- Dugsiya dhexe ee Mt. Tabor Middle School wuxuu qaban doonaa kulanka Dr. Martin Luther King Jr. “Peace Prize”.

- Dugsiga hoose ee Atkinson Elementary wuxuu qaban doonaa masraxa “Rainbow Dance Company” kaasi oo sahaminaya meesha uu xididka ku leeyahay muusiga hip-hop.
- Dugsiga dhexe ee Beaumont Middle School waxa masraxiyad ka dhigi doona kooxda fannaaniinta ee dugsiga, iyo Sebe Kan, oo ah koox jaaska ciyaarta oo Afrikaan ah oo deegaanka ah, iyo hadal uu jeediyo Dr. Michael “Chappie” Grice oo kusaabsan Bisha Taariikhda Madow.
- Dugsiga dhexe ee Roseway Heights Middle School wuxuu soo bandhigi doonaa fiidyawyo ay sameeyeen Wariyayaasha RWH-ka dugsiga, sidoo kale wuxuu soo bandhigi doonaa islaaydhyo ah ardayda dugsiga ee loo aqoonsaday inay yihiin Afrikaanka Ameerikaanka ah, Madow ama Afrikaan.

**Manhajka:** Taariikhda madow waa qayb wayn oo kamid ah qorshayaasha casharrada degmada oo dhan sanadka oo dhan, bisha Febraayana si gaar ah ayey dugsiyadu u sii wayneeyaan.

- Dugsiga hoose ee Markham Elementary, ardaydu waxay wax ka baran doonaan nolosha Dr. King, waxay qori doonaan gabayo waxayna daraasayn doonaan dhaqdhaqaaqa xuquuqda rayidka.
- Dugsiga hoose ee Llewellyn Elementary, buugaagta sawirka iyo taariikh nololeedka ayaa lagu dari doonaan cutubyo ah Lucy Calkins.
- Dugsiga Odyssey, ardaydu waxay daawan doonaan fiidyowga Xaddaaraddii Waynayd ee Afrikaanka, dugsigana waxa lagu sharrixi doonaa sabuuradaha ogaysiinta iyo bandhigyo buugaagta ah.
- Dugsiga hoose ee Woodstock Elementary casharro kala duwan ayuu leeyahay, oo ay kamid yihiin sare-u-akhrin, fiidyawyo hadal ah iyo dokumentariyo.
- Dugsiga César Chávez K-8, ardayda dugsiga dhexe waxay u akhrin doonaan buugaag kusaabsan taariikhda madow ardayda K-5, golaha ardayda dugsi dhexena waxay u qaban doonaan munaasibado qado ah ardayda K-5.
- Dugsiga hoose ee Rieke Elementary waxay ardayda fasalka afraad iyo shanaad ka fulinayaan mashruuc farshaxan noocyo badan oo halmaa.
- Dugsiga hoose ee Duniway Elementary waxay leeyihiin cutubyo badan oo casharro ah, oo ay kujiraan Vanport oo ka qayb ah taariikhda Portland iyo shuruucda ka saaritaanka ee 1840-nadii.
- Ardayda fasalka shanaad ee dugsiga Whitman Elementary waxay qabanayaan mashaariic badan oo kusalasyan casharradooda Revolutionary War (Dagaalkii Kacaanka) iyo addoonsiga.

**Sidoo kale:** Dugsiyadu waxay bisha u dabbaaldegyaan qaabab kale:

- Dugsiga dhexe ee wuxuu bilaabayaa Midawga Ardayda Madow.
- Dugsiga hoose ee Vestal Elementary wuxuu qaban doonaa gaardi uu ku taageerayo Black Lives Matter.
- Dugsiga Faubion K-8 oo martigalinaya African American Mobile Museum (Madxafka Guurguura ee Afrikaanka Ameerikaanka ah, wuxuu qaban doonaa gaardiga nabadda waxaana jiri doona waxqabadka nashqadaynta albaabka.

- Dugsiga hoose ee Jason Lee Elementary wuxuu qaban doonaa dabbaaldeggisii sanadlaha ahaa ee 2<sup>aad</sup> ee “Black Brilliance”, oo leh masraxyo, muusig, cunto, farshaxan iyo barashada dhismaha oo dhan.
- Midawga Ardayda Madow ee dugsiga dhexe ee Hosford Middle School waxay abaabulayaan dhawr safar aqoonkororsi, oo ay kamid yihiin qaar ay ku tagayaan Mobile Black History Museum oo ku yaala Portland Community College, dibadbaxa “Call to Action” iyo ku dhawaaqid ka dhacaysa City Hall (Hoolka Magaalada), iyo safarro caawin oo ay ku tagaan dugsiyadooda hoose.
- Dugsiga hoose ee Ainsworth Elementary wuxuu ku qurxiyey sabuuraddiisa ogaysiiska ee hoolkiisa wayn shakhsiyaad iyo hal-ku-dhegyo taariikhi ah, hore iyo haddaba.
- Dugsiga Harrison Park K-8 wuxuu qabanayaa tartan nashqadaynta albaabka oo kusalaysan casharro kusaabsan shakhsi ama munaasibad Afrikaanka Ameerikaanka ah oo taariikhi ah, taasi oo horseedaysa socod loogu talagalay ardaydu inay ku arkaan albaabada samaysan.
- Dugsiga hoose ee Scott Elementary wuxuu qabanayaa tartan heerka fasalka ah oo dhibco lagu helayo oo ah nashqadaynta albaabka, kaqaybqaadashada bandhig hoolka soo dhawaynta ah oo qurux badan oo kusaabsan buugaagta, iyo buug sare loo akhrinayo. Fasalka guulaysta waxa loo qaban doonaa xaflad.